



Ku soo dhawow



Bristol



Tusmo

Tusuhu (buug-yaruhu) waxa uu ka koobanyahay	1
1. Imaanshahaaga kahor	7
Barashada af Ingiriisga (English).....	8
2. Imaanshahaaga Kadib	11
Guryaha (Housing).....	11
Adeegga Caafimaadka Qaranka (The National Health Service).....	13
Adeegyada Tallad (Advice Services).....	17
3. In aad Bristol ka shaqayso	20
Ways2Work.....	20
Shirkadaha shaqooyinka (Employment agencies).....	20
Wargeysyada maxaligga ah ee Bristol ka hawlgala (Local Newspapers)....	21
4. In aad Bristol ku noolaato ama degto	22
Gaadiidka.....	22
Luqadda aan Fuxada ahayn ee Bristol iyo Maadayska (Bristol colloquialisms and British Humour).....	23
5. Damaashaadka iyo Tamashlaynta Bristol (Enjoying Bristol)	24
Matxafyada iyo Carwooyinka Farshaxanka Bilaashka ah (Free Museums and Galleries).....	24
Idaacadda Bulshada (Community Radio).....	25
Dalxiiska Maalinlaha ah ee Qoyska (Family Days Out).....	25
Goobaha ama garoomada lagu Ciyaaro Kubadaha, iwm (Sporting Venues).	26
Socodka iyo Indho-indhaynta (Walks and Tours).....	27
Xafladaha.....	27
Waxyaabaha Bulshadu Qabato ama Loo Sameeyo (Community Activities)...	28

Ku soo dhawow Bristol!

Bristol waxay taariikh u leedahay in ay soo dhawayso dad ka kala yimid dhamaan dunida dactaladeeda. Waanu qiimaynaa waxyaabaha ay dadka muhaajiriinta ahi Bristol ku soo kordhiyeen, taasoo magaalada u faa'iidayso. Maadaama aad Bristol degantahay, waxaad go'aansatay in ay magaaladani gurigaagii noqoto. Adigoo ku guda jira tallaabooyinkii aad ku gaadhi lahayd yoolkaaga ama waxa aad higsanayso, haddana sii wakhti aad ku barato bulshadan iyo magaaladan, taariikhdeeda iyo dadkeeda. Imika waxaad xaq u leedahay, mas'uuliyadina kaa saaraantahay in aad caawiso jihada mustaqbalka ee magaalada iyo in laxaqiyo in horumarkeedu sii socdo.

Bristol waa magaalada ugu weyn ee koonfurta galbeed ee England, waxaana ku nool ilaa nus-milyan (500,000) qof. Sida ugu wanaagsan ee aad u baran karto deegaankan cusub ee kugu xeeran, magaaladana ku degi karto waa adigoo barta taariikhda magaalada. Bristol waxa ka dhaca feestooyin iyo xafladdo aad loo yaqaano sida Bristol Balloon Fiesta iyo Harbour Festival.

Shaqooyin kala duwan ayaa laga helaa Bristol iyo nawaaxigeeda. Qaybaha ugu weyn ee shaqaaleeya shaqaalaha heerka koowaad iyo labaad waa: Martigelinta (hudheelada la seexo, meelaha xafladaha iyo shirarka lagu qabsado, iwm.), Cunto Karinta (sida makhaayadaha), dukaamada, Xamuuulka iyo Badeecadaha (bakhaarada iyo baabuurta xamuuulka qaadda), Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada, iyo Dhismaha. Bristol waxa kale oo lagu yaqaanaa shaqooyinka xirfadaha gaarka iyokhuibradda looga baahanyahay sida: Samaynta diyaaradaha iyo waxa la xidhiidha (Aerospace), hal-abuurnimada iyo teknoolajiyadda casriga ha (Creative & Digital), Xirfadaha iyo Adeegyada Dhaqaalaha (Professional & Financial Services) iyo hawlaha ama shaqooyinka kaarboonka hoose (Low Carbon).

Waanu fahamsan nahay in waddan kale laga soo guuro oo meel ka duwan la degaa ay tahay arrin aan la dhayalsan karayn. Buugyarahan ama waraaqahan soo dhaweynta ah waxa loo soo diyaariyay in ay adiga kaa caawiyaan sidii aad Bristol u degi lahayd, ugana dhigi lahayd gurigaagii cusbaa. Fursado aad u wanaagsan ayaa ku sugaya marka aad bulshadayada nolol cusub ka dhex bilowdo, macluumaadka halkan ku qoran ayaana kaa caawin doona in aad fursadahan sida ugu wanaagsan uga faa'iidayso.

Bristol ku soo dhawow.

Golaha Deegaanka Bristol

Sida loo isticmaalo Tusehan (Guide) ama Buug-Yarahan

Tusehan waxa lagu tarjumay luqaddaada koowaad, laakiin haddii aad gujiso xadkhaha ama xidhiidhiyeyasha internetka (internet links) si aad akhbaar kale iyo caawimo u hesho waxa laga yaabaa in ay Ingiriisi (English) oo keliya ku qoranyihiin.

Haddii aad isticmaalayso Internet Explorer bogagga shabakada (web pages) luqadaada ayaad ku tarjuman kartaa adigoo calaamadaynaya (highlighting) qoraalka aad doonyaso in aad tarjumto adigoo isticmaalaya 'Translate with Bing', raacayana waxa lagu farayo (instructions).

Xadkhaha ama xidhiidheyaasha internetka (Internet links)  waxa ku tusaya gacan sawiran (hand cursor) si aad isla markiiba u hesho.

Tusahan 5 qaybood ayaa loo qaybiyay:

1. Imaanshahaaga ka hor
2. Imaanshahaaga kadib
3. In aad Bristol ka shaqayso
4. In aad Bristol ku noolaato
5. Xiisaha iyo raalligelinta Bristol

Qayb kastaa waxay kuu soo bandhigaysaa macluumaad kaa caawiya sidii aad Bristol u degi lahayd iyo xadkhaha degelada (links to websites) aad caawimo dheeraad ah ka heli karto. Degeladan waxaad ka geli gartaa adigoo isticmaalaya telefoonada casriga ah (smartphones), kombuyuutarada gacanta (laptops) iyo aaladaha kale ee internetka lagu isticmaali karo.

Haddii aanad guriga ama telefoonka gacanta internet ku isticmaali karayn ama aanad haysan, waxa jira goobo aad internet bilaash ah ka heli karto.

Maktabadaha badankoodu waxay leeyihiin kombuyuutaro aad internetka ka isticmaali karto adigoo aan wax lacag ah lagu weydiinin. Maktabaduhu waa meelaha ugu haboon ee aad macluumaad ka heli karto, sida waxaad ka ogaan gartaa waxyaabaha Bristol ka socda/dhacaya, shaqooyinka la soo xayeysiiyo iyo akhbaar ku saabsan xaafadda aad degantahay iyo agagaarka. Maktabadaha qaarkood waxaad ka heli kartaa bugaag ku qoran afkaaga hooyo, haddii aanay bugaataa hayni waxaad codsan kartaa in ay kuu dalbaan.

Si aad u ogaato maktabadda kuugu dhow, fadlan guji xadhiga degelka soo socda.

- [Liiska Maktabadaha Bristol \(List of Bristol Libraries\)](#)

Sida loo helo caawimo iyo taageero

Bristol waxa jira hay'ado dadka siiya caawimo iyo taageero si ay noloshooda u maareeyaan, una xaliyaan dhibaatooyinka la soo dersa. Tan waxaanu u naqaanaa talo bulsho. Talo bulsho iyo hay'adaha taageeradu waxay kaa cawin doonaan dhibaatooyin kala duwan, waxy kaloo kaa caawin doonaan in ad ka faa'iidsato firsadaha tusehan (this guide) ku qoran.

Si aad u hesho hay'adaha talada iyo taageerda bixiya, fadlan guji xadhiga degelka soo socda.

- [Baadh ururada iyo haya'daha taageerada bixiya](#)

Goobaha Wi-Fi laga helo (Wi-Fi Hotspots)

Haddii aad haysato Wi-Fi ama telefoonada gacanta ee casriga ah, waxa jira goobo badan oo Bristol ka tirsan oo aad isticmaali karto ayna ka mid yihiin makhaayadaha laga shaaheeyo iyo dhismayaasha ay ku yaalaan dukaamada ganacsiga. Xagga hoose waxa ku qoran xadhigga degel (website link) ku siinaya khariirad muujinaysa dhamaan goobaha Wi-Fi ku yaalo ee Bristol ka tirsan.

- [Goobaha Bristol ee Wi-Fi ku yaalo \(Wi-Fi Hotspots around Bristol\)](#)

Tusahani wuxuu ku bilaabmayaa qayb si kooban uga hadlaysa sida aad Bristol u degi lahayd, shaqanna u heli lahayd.

Tallooyin wanaagsan

Dadka waddamada kale muddo hore ka yimid ee si fiican u degay ayaa runtii macluumaad faa'iido leh iyo tallooyin siin kara dadka waddanka ku cusub.

Kuwani waa qaarr ka mid tallooyinkooda ugu wanaagsan.

1. Luqadda Ingiriisiga soo baro intaanad UK iman ama isla markaad timaaddo iskuulka luqadda gal oo afka baro.

'Runtii way ugu adkaatay in aan fahmo isticarooyinka (ama hadalada hoos ka tuurka ah), lahjaddooda suuqadiga ahina way igu adkaatay. Dhibaato badan ayaan kala kulmay in aan fahmo. Kooxo kala duwan oo bulshada k'amid ah ayaan la xidhiidhay, kana mid noqday si aan u barto marka ay dadku kaftamayaan, iwm.' s(Fatima EU).

2. Maalin walba ku hadal Ingiriisi oo ku dhaqan ku hadalkiisa.
3. Wakhti sii in aad barato dhaqanka Bristishka Bristol.
4. Ganacsiyo badan oo UK ka hawlgala ayaa leh degelo (websites) shaqooyinka u xayeysiiya. Internetka isticmaal si aad shaqo u hesho, intaanad Bristol iman xidhiidh badan samee.
5. Isticmaal xafiisyada shaqada (Job Centres), hay'adaha shaqada (agencies), wargeysada maxaliga ah (local newspapers) iyo idaacadda (radio), Facebook, Gumtree, degelada shirkada loo shaqeeyo, qoyska, dhamaan dadka aad waddanka ka taqaano si aad shaqo u hesho.

'Waraaqaha (documets) lagaaga baahanyahay sii diyaarso, sida CV, sii aad shaqo u hesho.' (M Ghana)

6. Haddii ay suurtoagal tahay, intaanad iman kahor la xidhiidh NARIC, The National Academic Recognition Information Centre si shahaadooyinkaaga loo aqoonsado.

"Intaanan shaqo codsanin waxaan baadhay sidii aan shahaadooyinkayga aan UK ugu isticmaali lahaa haddii ay aqbalayaan, sidaa daraadeed wixii akhbaar

ah ee aan u baahnaa ayaan internetka ka soo urursaday. Kadib waraaqahaygii ayaan diray anigoo foomam buuxiyay, kadibna waxa la iigu soo bedelay kuwo British ah ...” s(Kasia from Poland)

7. Haddii ay suurtoagal tahay, CVga soo raaci tixraac shaqo (reference), ama keen qof Bristol laga yaqaano oo tixraac kuu noqda haddii aanad cadaayn kale heli karaynin.
8. Iskaa wax u qabso (voluntary) ku shaqee si aad u hesho khibrad iyo tixraac shaqo, luqaddaada sii xooji, dhaqanka Britishka wax ka baro.
9. La xidhiidh oo booqo shirkadaha loo shaqeeyo ama shaqaale qaadanaya, CVgaagana u dir.
10. Shirkadaha shaqaale u baahan toos ula xidhiidh, email u dir ama degelada (webpages) kala xidhiidh intaanad Bristol imanin iyo markaad timaadaba.
11. Isticmaal talo bulsho sida Citizen Advice Bureau si aad u hesho tallooyin ku saabsan sida shaqooyinka loo doonto, dhaqaalaha iyo maareynta lacagta, guryaha iyo adeegyada sharciga.

1. Imaanshahaaga kahor

Intaanad iman kahor waxa jira tallaabooyin aad u baahantahay in aad qaado. Haddii aad tallaabooyinkan raacdo intaanad iman kahor, safarkaaga UK wuu kuu fududaan doonaa.

Soo qaado fiisaha (Visa) saxda ah

Si aad UK ugu noolaato oo aad uga shaqayso, fiise (visa) ayaad u baahantahay. Degelada (websites) hoos ku qoran waxy kuu sheegayaan sidii aad fiise u soo qaadan kahayd.

- [Maclumaad ku saabsan Fiisaha iyo Socdaalka](#)

Marka aad fiisaha codsanayso, waa in aad Ingiriisi (English) ku codsataa. Fadlan guji xadhiga degelka soo socda si aad u hesho akhbaar ku saabsan sida fiisaha loo codsado.

- [Codsiga fiisaha \(Apply for a Visa\)](#)

Waxa laga yaabaa in aad fiise u baahato si aad UK u timaado oo aad wax uga dhigato, booqato ama ka shaqaysato. Si aad u ogaato in aad fiise u baahantahay, fadlan guji xadhiga degelka soo socda.

- [Iska hubi in aad fiise \(Visa\) u baahantahay](#)

Xadhiga degelka soo socda (next link) wuxuu kuu xisaabi doonaa qiimaha fiisaha (visa fees). Fadlan guji xadhiga degelka si aad ugu buuxiso akhbaarta lagaaga baahanyahay, kadibna aad u ogaato qiimaha fiisaha aad u baahantahay.

- [Qiimaha Fiisaha](#)

Baasaboorkaaga iska hubi

Si aad UK u timaado waxaad u baahantahay basaboorka aan dhicin, waana in aanu ahaanin mid aan dhacsanayn ama aan dhicin wakhtiga booqashadaada iyo fiisahaaga. Waana wax loo baahanyahay in aad tusto haddii aad shaqo doonato.

Sidii aad Shahaadooyinkaaga UK ugu isticmaali lahayd

Shahaadooyinka aad haysato iyo waxbarashadii aad dhamaysaytay mar walba lama mid noqonayaan kuwa UK. Waxaad u baahantahay in aad lacag bixiso si aad u hesho waraaqo cadaynaya in ay shahaadooyinkaagu u dhigmaan kuwa UK. Arrintaa waxa sameeya NARIC.

Wixii caawimo ah, fadlan fadlan guji xadhiga degelka soo socda.

- [Sidee bay shahaadooyinka aad sidataa ugu Qiimaha Fiisaha dhigmaan kuwa UK?](#)



Barashada af Ingiriisga (English)

Luqad cusub in la bartaa maaha wax sahlan, laakiin caawimo ayaad ka helaysaa internetka iyo bulshada. In aad Ingiriisiga fahamto waxay aad ugu muhiimtahay shaqooyinka badankooda iyo in aad ka faa'iideysato deganaanshaha Bristol iyo UK.

Waxa jiraa koorasyo badan oo ESOL ah (English for Speakers of Other Languages) oo aad Bristol ku samayn karto, kaana caawinaya barashada afka Ingiriisiga.

Xadkhaha degelada (web links) soo socda waa hay'adaha kaa caawin kara in aad Ingiriisiga barato.

- [City of Bristol College](#)
- [Local Learning](#)
- [ESOL class- Refugee women of Bristol](#)
- <http://www.bristolcourses.com/>
- [Workers Educational Association South West](#)
- [Gov.uk - Improve your Maths and English](#)
- [Ashley Community Housing - Himilo Training Centre](#)
- [City Academy](#)

Easton Learning Zone waxay bixisaa koorasyo ESOL iyo xisaab ah oo oogu talagalay qaxootiga iyo ardayda kale ee aanay luqadooda koowaad Ingiriisi ahayn – 94, Stapleton Rd & 230 Stapleton Road, Easton, Bristol, BS5 0RB. Telephone: 0117 941 4114

Waxa laga yaabaa in aad xaq u leedahay in aad hesho koorasyo ESOL ah oo aan lacag lagaa qaadayn haddii aad shaqo doon tahay. Faahfaahin dheeraadd ah ka eeg qaybta Inaad Bristol ka Shaqayso (Working in Bristol).

Waxa kale oo aad luqadda ka baran kartaa iskuulada luqadda ee gaarka ah (private language schools) ee Bristol ku yaala.

Fadlan guji xadhiga degelka soo socda wuxuu ku siinayaa liis ku saabsan iskuulada luqadda laga barto ee Bristol ku yaala.

- [Iskuulada Luqadda \(Language Schools\)](#)

Haddii aad Bristol u soo guurayso adigoo luqaddaada Ingiriisigu fiicantahay, waxaad samayn kartaa koorasyo xisaab ah ama aqoon sare ku siiya ama aad habeenkii dhigato si aad aqoontaad u kordhiso.

Fadlan guji xadhiga degelka soo socda si aad u aragto koorasyada kugu haboon una codsato.

- [City of Bristol College](#)

Bristol University waxay bilowday deeq waxbarasho ay siinayso dadka qaxootiga ah si ay u dhigtaan shahaadooyinka jaamacadda heerka koowaad (degree).

Fadlan guji xadhiga degelka soo socda si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

- [Bristol University](#)



**Baraha Bulshada (Social Media) iyo Macluumaadka
Agagaarka/Nawaaxiga (Local Information)**

Intaanad Bristol imanin waxa fiican in aad baraha bulshada sii eegto, waayo waxay kuu sahlaysaa in aad la sii xidhiidho dadka reer Bristol iyo in aad shaqooyin sii eegato.

Xagga hoose waxa ku qoran liis ku saabsan baraha bulshada. Waxaad ka heli doontaa waxa Bristol ka socda, wararka iyo shaqooyinka la xayeysiinayo. Faa'iido ayay kuu leedahay in aad Bristol wax ka sii fahamto in aanad u soo guurin.

- [Facebook](#)
- [Jobs in the Voluntary and Community Sector](#)
- [Twitter](#)
- [Ecojam - Events jobs and organisations in Bristol](#)
- [Gumtree](#)
- [Indeed](#)
- [Reed](#)
- [The Pigeon - Bristol Community News](#)

2. Imaanshahaaga Kadib

Waxa jira meelo badan iyo degelo (websites) aad taageero ka heli karto. Xagga hoose waxa ku qoran kooxaha ama hay'adaha aad taageerada ka heli karto ee Bristol ka hawlgala iyo dhamaan waddanka.

Ururada Taageera Muhaajiriinta (Migrant Support Networks)

- [Bristol Refugee rights](#)
- [Migrant Help UK](#)
- [Bristol Refugee Action](#)
- [National Network for Immigrants and Refugee Rights](#)
- [Bristol Somali Forum](#)
- [Somali Resource Centre](#)
- [Bristol and Avon Chinese Women's Group](#)
- [Arabic Classes](#)
- [Anglo Polish Society](#)
- [On Line News for Greeks in Bristol](#)
- [Bristol Muslim Cultural Society](#)
- [Bristol French Circle](#)
- [German Saturday School](#)
- [Ashley Community Housing](#)

Guryaha (Housing)



Kadib marka aad Bristol timaado waxaad u baahantahay in aad ka fekerto guri iyo daryeeka ciyaalka (childcare).

In Bristol guri laga helo way yara adkaan kartaa. In aad hesho guri aad gaar u kiraysto ama mid dawladeed, wakhti dheer baad sugi kartaa. Guryaha Bristol waa qaali, baahidooduna aad bay u badantahay.

Waxa jira degelo (websites) badan iyo shirkado guryaha kireeya (estate agents) oo aad isticmaali karto si aad guri uga hesho xaafadda aad doonayso in aad degto.

Xagga hoose waxa ku qoran degelo (websites) kaa cawin kara si aad Bristol guri uga hesho. Waxa kale oo aad u isticmaali kartaa in aad ogaato guryaha banaan iyo qiimahooda.

- [Rightmove](#)
- [Prime Location](#)
- [Zoopla](#)
- [Gumtree](#)

Sida kale ee aad ku heli karto guri aad ku noolaato waa adigoo la xidhiidha dawladda hoose, tani waa Golaha Deegaanka Bristol.

Si aad u hesho akhbaar ku saabsan sida dawladda hoose guri looga helo, fadlan booqo degelka soo socda.

- [Guryaha Golaha Deegaanka Bristol](#)



Si aad qol ama guri uga kiraysato mulkiile gaar ah waxaad u baahantahay tixraac (reference). Sida caadiga ah waa in aad warqad ka keento qof mar hore guri kaa kireeyay oo cadeynaya in aad tahay qof wanaagsan oo guri laga kirayn karo. Kirada qolku way ka jabantahay kirada guriga (guri amam flat). Degelka hoose booqo si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida aad u kiraysan karto guri aanay dawladdu lahayn (renting privately) iyo xuquuqdaada.

- <https://www.bristol.gov.uk/housing/private-tenants>

Golaha Deegaanka Bristol wuu kaa caawin karaa wixii dhibaato ah ee kaala soo derista marka aad si gaar ah guri u kirayshato. Golaha deegaanku wuxuu ku siin karaa caawimoo iyo talo ku saabsan khatarta ay leedahay in aad guri la'aan noqoto ama haddii laguula dhaqmo si cadaalad darro ah.

Fadlan degelka hoose booqo si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

- [Bristol housing advice](#)

Caawimo dheeraad ah oo guryaha la xidhiidha booqo degelada hoose.

- [Bristol City Council advice on Pests, pollution, noise and food](#)
- [Bristol Neighbourhood and Home Watch Network](#)

Xafiisyada Golaha Deegaanka Bristol iyo Adeegyada

Golaha Deegaanka Bristol wuxuu leeyahay adeegyo kala duwan iyo kooxo ku caawin kara inta aad Bristol degantahay. Fadlan degelka hoose booqo si aad u hesho macluumaad ku saabsan sida aad kooxahaa ula xidhiidhayso haddii aad doonayso in aad la hadasho, iyo meelaha aad caawimo u doonan karto.

- [Sida loola xidhiidho Golaha Deegaanka Bristol \(Bristol City Council Contacts\)](#)



Adeegga Caafimaadka Qaranka (The National Health Service)

Haddii aad bixisay lacagta dheeraadka ah ee daryeelka caafimaadka oo fiisahaaga sidaa lagugu soo siiyay ama haddii aanad u baahnayn in aad lacagta

dheeraadka ah bixiso, markaa waxaad sharci ahaan xaq u leedahay in aad isticmaasho adeegyada caafimaadka NHS.

Waa inaad iska diiwaangelisaa dhakhtarka xaafadda iyo ka ilkaha. Haddii ay buuxaan waxay kuu sheegi doonaan meelaha kale ee aad iska diiwaangelin karto.



Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dhakhtarka xaafaddaada (GP) fadlan booqo degelka hoose, kadibna ku qor postcode ama magaca xaafadda aad degantahay.

- [Baadh dhakhtarka xaafadda ee kuu dhow \(Find your local GP\)](#)

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dhakhtarka ilkaha ee xaafaddaada u dhow fadlan booqo degelka hoose.

- [Baadh dhakhtarka ilkaha ee xaafaddaada u dhow \(Find your local Dentist\)](#)



Daryeelka ilmaha (Childcare)

Si aad u hesho qof ama hay'adaha/shirkadaha bixiya adeegyada daryeelka caruurta ee Bristol ka hawlgala fadlan booqo degelka hoose.

- [Baadh adeegyada daryeelka ilmaha \(Find a childcare provider\)](#)

Adeegga daryeelka ilmaha ee aad doonaysaa ama heli kartaa wuxuu ku xidhanyahay da'da ilamaha. Ilmaha 4 sannadood da'doodu ka weyntahay waa in ay iskuul tagaan.

Dhamaan ilmaha ay da'doodu u dhexayso 3-4 sannadood waxay sharci ahaan xaq u leeyihiin in ay helaan ilaa 570 saacadood oo daryeelka ilmaha ah ama waxbarasho. Ilmahaagu haddii uu 2 jir yahay waxa laga yaabaa in uu sharci ahaan xaq u leeyahay waxbarasho iyo daryeel bilaash ah. Booqo degalka hoose si aad u ogaato in ilmahaagu uu heli karo waxbarasho iyo daryeel bilaash ah.

- [Caawimada kharashka daryeelka ilmaha \(Help with Childcare costs\)](#)

Xagga hoose waxa ku qoran sida aad Bristol uga heli karto cid bixisa adggegyada daryeelka ilmaha. Haddii aad postcode-kaaga ku qorto waxaad heli kartaa waxa kuggu haboon haddii aad adigu bixinayso lacagta ilmaha lagu daryeelayo.

- [Gov.uk - Browse childcare](#)
- [Childcare](#)

Waa muhiim in tixraac (References) in la helaa marka aad doonayso cid ilamaha kuu daryeesha, waa in aad hubisaa in qofka aad shaqada siinayso uu tixraac keenaa. Tani waxay xaqiijinaysaa in qofka kuu shaqaynayaa uu yahay qof loo aqoonsanyahay oo xirfad u leh daryeelidda caruurta.

Xarumaha caruurta waxay ku bahsanyahay dhamaan magaalada Bristol, waxayna caawimo iyo taageero siiyaan waalidiinta si ay ilamahooda u daryeelaan, nolol fiicanna ugu noolaadaan. Xarunta caruurta ee xaafaddaada ayaa ka mas'uul ah in caawimo iyo taageero ku siiyaan. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xarunta carruurta ee xaafaddaada fadlan booqo degelka (website) soo socda.

- [Baadh xarunta carruurta ee xaafaddaada \(Find your local Children's Centre\)](#)

Baahi badan oo jirta awgeed, xarumo badan oo kuwacarruurta ah ayaa bixiya koorasyo ESOL ah. Iska hubi oo weydii in xarunta carruurta ee xaafaddaadu ay bixiso koorasyo ESOL ah.



Xanaanooyinka iyo dugsiyada waxbarashada (nurseries and schools)

Xanaanooyin iyo iskuulo badan oo Bristol ku yaalla waa la buuxiyaa, taa macnaheedu waxay tahay in aanu ilmahaagu mar walba heli karayn xanaanada ama iskuulka ay doorbidayaan (mudnaanshaha koowaad siinayaan).

Xagga hoose waxa ku qoran tallooyin ku caawin kara marka aad ilmahaaga iskuulka geynayso.

- Mid keliya ha dooran ee dhawr dooro – ilmuhu badanaaba ma helaan iskuulka ay mudnaanshaha koowaad siiyaan, sidaa daraadeed dhawr kala duwan codso.
- Waa inaad ogaataa wakhtiga aad u baahantahay in aad codsiga geyso
 - [Codsashada iskuulada \(Applying to schools\)](#) - Codsashada iskuulada (Applying to schools) – halkan riix si aad u hesho macluumaad ku saabsan wakhtiga iyo sida aad iskuulada u codsanayso.
- Iskuulada waa in aad barataa ooaad si fiican uga wardoontaa. Waa muhiim in aad ogaato shuruucda iskuulada marka aad codsanayso.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida aad u helayso xanaanooyinka iyo iskuulada xaafaddaada fadlan booqo degalka (website) hoose.

- [Dugsiyada waxbarashada iyo xanaanooyinka Bristol \(Bristol Schools and Nurseries\)](#)

Ururada Shaqaalaha iyo Hay'adaha Xirfadaha Taageera (Unions and Professional Bodies)

Ururada shaqaaluhu waxay ka shaqeeyaan danaha shaqaalaha, waxayna kaa caawin karaa dhibaatooyinka shaqada kaa soo gaadha – gaar ahaan haddii aad dareento in si aan cadaalad ahayn laguula dhaqmo.

Liiskan hoose waa ururada shaqaalaha ee muhaajiriinta caawiya.

- [TUC](#)
- [Unison](#)
- [European Migrant Workers Union](#)
- [International Trade Union Confederation](#)



Adeegyada Tallad (Advice Services)

Waxa aad Bristol ka helaya adeegyo kala duwan oo kaa caawinkara arrimo kala duwan.

Tallooyinka ku saabsan amaahda iyo lacagta:

- [Talking money](#)

Avon iyo Bristol Law Centre waxay bixiyaan talo dhinaca sharciga ah oo lacag la'aan ah. Arrimo badan aya wax ka qabtaan sida cunsuriyadda, guryaha iyo arrimaha la xidhiidha [xafiiska] socdaalka (immigration).

- [Avon and Bristol Law Centre](#)

Bristol Citizen Advice Bureau waxaad ka heli kartaa tallooyin la xidhiidha arrimo kala duwan.

- [Bristol Citizen Advice Bureau](#)

South Bristol Advice Service waxay bixiyaan tallooyin kala duwan kana midyihiin guryaha iyo xuquuqda lacaga lagu kabo dadka danyarta ah.

- [South Bristol advice](#)

North Bristol Advice Service waxay bixiyaan tallooyin kala duwan kana midyihiin guryaha iyo xuquuqda lacaga lagu kabo dadka danyarta ah.

- [North Bristol advice](#)

Tallooyinka ku saabsan guryaha iyo guri la'aanta.

- [Shelter](#)

Bristol Hate Crime Services waxay ku siinaysaa tallo iyo taageero aan cidina ogaanayn (qarsoodi ah) haddii aad aragto ama aad dareemayso in lagu cunsuriyadeeyay. Booqo degelka hoose.

- [Bristol Hate Crime Services](#)

Bristol Women's Aid helps waxay caawiyaan dumarka guryaha lagu dilo ama gacan ka hadal iyo handadaad lagu hayo.

- [Bristol Women's Aid](#)

Haddii aad caawimo degdeg ah u baahantahay

Wac 999 xaalad degeg ahi haddii ay jirto.

999 waa adeegyada xaaladaha degdega ah. Kana mid yihiin caafimaadka degdega ah (ambulance), ciidanka amaanka (police) ama dabdemiska (fire service). Haddii xaalad caafimaad oo degdeg ahi kula soo kulanto waa in aad wawdaa 999. Way kula hadli doonaan, iyagaana kuu gudbin doona adeegga aad u baahantahay.

111 waxa ay iyaguna ku siin karaan talo caafimaad haddii xaaladdaadu aanay degdeg ahayn laakiin aanad dhakhtarkaaga sugi karaynin.

Haddii ay ku haysato dhibaato kale oo caafimaad ah, dhakhtarkaaga la xidhiidh oo ballan ka samayso.

Naafadda iyo xanuunka (Disability and Illness)

Haddii aad naafo tahay ama ay jiraan xaalado caafimaad oo saamayn ku yeeshay in aad shaqayso, sharciga UK wuxuu qabaa in aad xaq u leedahay in lagaa caawiyo sidii aad shaqadaada u qabsan lahayd. Caawimaadaa waxa ka mid ah qalab, waxyaabah aad isticmaasho oo lagaa bedelo iyo qof kuu shaqeeya. Hawlahan badankooda waxa maalingelin kara qorshaha ay dawladdu u soo dejisay ([Government Scheme Access to work](#)).

Haddii adiga, ilmahaaga ama qof qoyska ka mid ahi uu naafo yahay ama uu xanuusanayo, waxa laga yaabaa in aad ka faa'iideysato macluumaadka ku qoran degelka (website) ama taageerada aad ka heli karto hay'adaha ka hawlgalo magaaladaada ama dhamaan waddanka oo dhan:

Haddii adiga, ilmahaaga ama qof qoyska ka mid ahi uu naafo yahay ama uu xanuusanayo, waxa laga yaabaa in aad ka faa'iideysato macluumaadka ku qoran degelka (website) ama taageerada aad ka heli karto hay'adaha ka hawlgalo magaaladaada ama dhamaan waddanka oo dhan:

- [Disability Rights UK](#)
- [Bristol Disability Equality Forum](#)
- [WECIL](#) (West of England Independent Living Centre)
- [Remploy](#)
- [PLUSS](#)

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hay'adahan iyo adeegyada kale ee naafada iyo xanuunada waxa laga heli karaa degelada (websites) [Ways2Work](#) iyo [Well Aware](#).

3. In aad Bristol ka shaqayso

Ways2Work Employment Support (Taageerada Shaqada)

Ways2Work waa qayb ka mid ah Golaha Deegaanka Bristol, waxayna adeegyo kala duwan oo taageero ah siisaa dadka magaalada degan. Iyadoo la shaqaynaya hay'adaha kale ee ka hawlgala Bristol iyo koonfur galbeed England, waxay soo qabanqaabiyaan carwooyin shaqo (job fairs), waxay qaybiyaan macluumaad iyo ta ugu muhiimsan oo ah in ay xidhiidhiyaan hay'adha kala duwan ee taageerad bixiya, goobaha waxbarashada (sida colleges) iyo shirkadaha shaqooyinka bixiya si ay u caawiyaan dadka Bristol ku nool.

- [Ways2Work](#)

Shirkadaha shaqooyinka (Employment agencies)

Bristol waxa ka hawlgala shirkado badan oo dadka shaqooyin u soo hela oo adiga kaa caawin kara sidii aad shaqo u heli lahayd. Waxa laga yaabaa in ay hayaan shaqooyin maalin walba laga shaqaynayo, kuwo dhawr maalmood ama saacado gaar ah la shaqaynayo, shaqooyin joogto ah iyo kuwo ku meelgaadh ah (full time jobs, part time jobs, permanent jobs and temporary jobs).

Fadlan booqo degelada (websites) hoose si aad u hesho shirkadaha shaqada ee Bristol ka hawlgala.

- [Lucy Bristow](#) - shaqooyinka xafiisyada, xoghaynta, wax iibinta, sharciyada iyo adeegga macaamiisha (Office, business administration, legal, marketing/sales, PA/Secretarial, HR, finance and customer service jobs).
- [Red Recruitment](#) - Shaqooyinka , xafiisyada iyo xarumaha wicitaanka (Accountancy, office support and call centre staff.)
- [Robert Half](#) - Shaqooyinka xisaabaadka, bangiyada, dhaqaalaha, teknoolojiyada iyo maareynta (Accounting, banking, finance, technology and administration recruitment.)
- [Pertemps](#) - Shaqooyinka guud (General employment.)

Degelkan hoose wuxuu kuu fududeynayaa in aad baadho shirkadaha shaqooyinka ee iyaguna magaalada ka shaqeeya.

- [Baadhitaanka shirkadaha shaqada \(Recruitment agency search\)](#)

Waxa kale oo aad internetka ka baadhi kartaa shaqooyinka Bristol looga baahanyahay (web search 'jobs in Bristol').



Wargeysyada maxaligga ah ee Bristol ka hawlgala (Local Newspapers)

Wargeysyada magaalada ka hawlgala iyagana shaqooyinka ayaa lagu soo xayeysiiyaa. Suuqa ayaad wargeysyada ka iibsana kartaa. Wargeyska magaaladu waa Bristol Post.

Wargeysyada maxalliga ah waxa kale oo laga helaa internetka, degeladan (websites) hoose booqo si aad wargeysyada wax uga ogaato.

- [Bristol Post](#)
- [Bath Chronicle](#)

Meelaha Kale ee Shaqooyinka lagu Xayeysiiyo



Xafiiska shaqada (Job Centres)

Xafiisyada shaqadu waxay kaa caawin karaan in aad shaqo hesho iyo barashada afka Ingiriisiga (learning English).

Macluumaad dheeraad ah fadlan booqo degeladan hoos ku qoran.

- [Find Your Local Job Centre](#)
- [Job search](#)

Xarumaha Iskaa Wax u Qabso iyo Fursadaha (Volunteer Centres and Opportunities)

Iskaa wax u qabso (volunteering) waa marka uu qofku hay'ad u shaqeeyo isagoo aan wax mushahar ah ka qaadan ama basraac keliya la siiyo. Dadku waxay sidan u sameeyan sababo kala duwan waayo:

- Waxay ka caawisaa in ay khibrad helaan iyo in ay xirfado cusub bartaan

- Luqadda Ingiriisiga ayay sii xoojiyaan, saaxiibo cusubna way samaystaan
- Dadka iyo bulshaddadaba waa caawinkartaa

Fursado badan oo iskaa wax u qabso loogu shaqeeyo ayaa Bristol ka jira. Xagga hoose waxa ku qoran degelada (websites) aad ka heli karto macluumaad dheeraad ah iyo fursadaha ay hayaan.

- [Volunteer Bristol](#)
- [Bristol Zoo](#)
- [Do-It](#)
- [RSPCA](#)

4. In aad Bristol ku noolaato ama degto

Goobaha Caabudaadaa (Places of Worship)

Bristol waxay leedahay goobo badan oo cabuddaada loogu talagalay, sida ay diintaadu ku faraysana aad u dhaqmi karto (u caabdi karto). Xagga hoose waxa ku qoran goobaha caabudaada Bristol ku yaala iyo cinwaanadooda.

- [Goobaha Caabudaadda \(Places of worship\)](#)

Gaadiidka

Basaska – Magaaladu waxay leedahay basas badan oo magaalada ka shaqeeya, halka aad doonaysana aad ku gaadhi karto.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan gaadiidka magaalada iyo basaska fadlan booqo degelka hoose.

- <https://travelwest.info/>



Baaskiil (ama bushkuleeti) – Waxa jira dariiqyo badan oo aad si amaan ah baaskiilka ugu mari karto, magaalada oo dhanna ku wareega.



Khariidadani waxay ku tusaysaa dhamaan dariiqyada/wadiiqooyinka Bristol ee baaskiiladda loogu talagalay. Fadlan booqo degelka hoose.s

- [Dariiqyada baaskiilka \(Sustrans cycle route\)](#)

Tareenada - Bristol waxay tareeno magaaalada dhexmara, kuna xidhma ama u kala goosha magaalooyinka kale.

- [National rail](#)

Luqadda aan Fuxxada ahayn ee Bristol iyo Maadayska (Bristol colloquialisms and British Humour)

Dadka reer Bristol waxay leeyihiin hab ay u hadlaan oo ay magaalooyinka kale kaga duwanyihiin. Xagga hoose waxaad ka heli kartaa degelo (websites) aad ka dheegan karto hadalada iyo halkudhigyada Bristol caanka ka ah iyo maadayska Britishka.

- [Buzzfeed](#)
- [Born and Bred Bristolian babble](#)
- [BBC Bristol culture](#)

5. Damaashaadka iyo Tamashlaynta Bristol **(Enjoying Bristol)**

In aad Bristol iyo agagaarkeeda wax ka ogaato oo aad si fiican u fahamto waa damashaad fiican. Qaybtan ugu dambeysa ee macluumaadkani waxay ku saabsantahay matxafyada, seerayaasha iyo meelaha dalxiiska lagu tagi kara inta aad Bristol degantahay ee aad ka shaqaynayso.



Matxafyada iyo Carwooyinka Farshaxanka Bilaashka ah (Free Museums and Galleries)

Bristol waxay leedahay matxafyo iyo carwooyin farshaxanka lagu soo bandhigo oo aad u wanaagsan, ku waasoo aad ka heli karto taariikhda magaalada iyo dhaqanka; lacagna laguma galo.

Degeladan (websites) soo socda waxaad ka heli kartaa matxafyada muhiimka ah ee Bristol ku yaala.

- [Bristol Museums](#)
- Bristol Museum and Art Gallery waa saddex dabaq oo aad lagu soo bandhigay farshaxan iyo sawiro. Waana bilaash ama lacag laguma galo.
- [Bristol Museum and Art Gallery](#)
- M Shed waa matxaf aad ka helayso macluumaad ku saabsan goobaha taariikhiga ah ee Bristol ku yaalla, dadka reer Bristol iyo nolosha magaalada ama sida loogu noolyahay.
- [M Shed](#)
- Georgian House Museum waxaad ka baran kartaa sida ay guryuhu ahaayeen wakhtigii Georgian (300 oo sannadood kahor).
- [Georgian house](#)
- Red Lodge Museum waxaad ka helayso taariikh 400 oo sannadood ka badan.
- [Red Lodge Museum](#)

- Blaise Castle House Museum – waxad ka helaysaa ama aad ka soo ogaan kartaa caruusadahii ama waxyaabihii ay caruurtu ku ciyaari jirtay waayadii hore, hugii ay xidhan jireen iyo sida ay guryahooda u maareyn jireen.
- [Blaise Castle House Museum](#)
- Bristol Record Office waxa yaala aarkiifiyada Bristol iyo nawaaxigeeda.
- [Bristol Record Office](#)



Idaacadda Bulshada (Community Radio)

Idaacadda bulshadu waa meel laga helo macluumaad wanaagsan oo magaalada ku saaabsan.

Bristol Community FM Radio

<http://bcfmradio.com/about-bcfm#>

Ujima Radio

<http://www.ujimaradio.com/>



Dalxiiska Maalinlaha ah ee Qoyska (Family Days Out)

Matxafka sayniska ee Bristol waa goob aad u xiiso badan oo la booqan karo. Waa goob aad sayniska ka baran karto da' kastoo aad tahay. Matafku wuxuu leeyahay habab kala duwan oo aad sayniska wax uga ogaan karto, una baran karto.

Macluumaad dheeraad ah, kana midyihiin qiimaha tigidhada, booqo degelka hoose.

- [At Bristol](#)

Bristol waxa kale oo ay leedahay beer xayawaan. In aad maalin beerta xayawaanka tagto waa is also home to a zoo. Exploring the zoo for a day can be very exciting and great fun for all the wax aad u wanaagsan, qoyska oo dhaminna ay ka helayaan.

Macluumaad dheeraad ah, kana midyihiin qiimaha tigidhada, booqo degelka hoose.

- [Bristol zoo](#)

Waxa kale oo jira beero kale oo Bristol iyo agagaarkeeda ku yaala – kuwaasoo leh qaar waaweyn iyo kuwo yaryar labadaba.

Degelka (website) hoose waxaad ka heli kartaa liiska beeraha kale ee magaalada ku yaala iyo akhbaar ku saabsan. Waxa kale oo aad ka baadhi kartaa waxyaabaha kale ee qoyska u fiican ee Bristol laga heli karo.

- [Local farms](#)

Bristol waxay leedahay xarumo loogu talagalay in lagu qabto ciyaaro kala duwan. Waanad tegi kartaa, kana qaybqaadan kartaa.

- [Leisure centres in Bristol](#)



Bristol waxa kale oo ay leedahay seerayaal (parks) badan iyo goobo lagu ciyaaro (play areas). Dhamaan seerayaashu sannadka oo dhan ayay furanyihiin, wax lacaga laguma galo. Waxaana laga yaabaa in xaflado lagu qabto.

Liiska seerayaasha fadlan booqo degelka hoose

- [Local Parks](#)



Goobaha ama garoomada lagu Ciyaaro Kubadaha, iwm (Sporting Venues)

Bristol waxay leadahay kooxo kala duwan – kuwa yaryar oo bulshada ama xaafaduhu leeyihiin, iyo kooxo waaweyn sida Bristol City Football Club.

Bristol waxa ku yaala laba garoon oo waaweyn: Ashton Gate Stadium iyo Bristol Memorial Stadium. Labada garoonba waxyaabo kala duwan ayaa lagu qabtaa oo ka dhaca sannadka oo dhan, macluumaad dheeraad ah, kana midyihiin xafladaha iyo qiimaha tigidhada, booqo degelada (websites) hoose.

- [Ashton Gate Stadium](#)
- [The Memorial Stadium](#)



Socodka iyo Indho-indhaynta (Walks and Tours)

In aad Bristol ku dhex lugayso waxay kaa caawinaysaa degitaanka magaalada, iyo in aad si fiican u fahamto deegaanka kugu xeeran.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan socodka iyo Indho-indhaynta magaalada Bristol fadlan booqo degelada (websites) hoose.

- [Bristol free walking tour](#)
- [Bristol old city heritage trail](#)
- [Sightseeing and tours](#)

Waxa kale oo aad Bristol ku baran kartaa adigoo raaca basaska dusha ka furan ee dalxiiska. Bristol Insight Tour Bus ayaa hawlahaa ka shaqeeya.

- [Bristol Insight Tour Bus](#)



Xafladaha

Sannadka oo dhan xaflado kala duwan ayaa magaalada Bristol ka dhaca. Ka qaybqaadashada xafladaha bulshada iyo feestooyinku waxay caawiyaan deganaanshaha iyo ka mid ahaanshaha magaalada. Qaar baadan oo xafladahan ka mid ah lacag laguma galo.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xafladaha Bristol ka dhaca fadlan booqo degalada (websites) hoose.

- [Visit Bristol](#)
- [What's on in Bristol?](#)
- [Bristol 24/7](#)
- [Bristol Post - What's on?](#)

Waxyaabaha Bulshadu Qabato ama Loo Sameeyo (Community Activities)

Waa muhiim in aad ka qayb qaadata waxyaabaha bulshada loo qabto si aad u dareento in aad bulshada ka mid tahay. Xarumaha bulshada (community centres) ayaa badanaa lagu qabtaa xaflado kala duwan oo bulshada xaafadda loogu talagalay. Waxa laga yaabaa in ay jiraan xaflado ama feestooyin aan balaadhnayn oo xaafaddaada ka dhaca, aadna ka qayb qaadan karto. Tani waxay kaa caawin kartaa in aad asxaab samaysato, magaalada iyo bulshadaadana aad si fiican ula qabsato.



Macluumaad dheeraad ah iyo caawimo ku saabsan sidii aad u heli lahayd xarunta bulshada ee xaafaddaada (your local community centre) fadlan booqo degalka hoose.

- [Baadh xarunta bulshada ee xaafaddaada \(Find your local community centre\)](#)

Waxaan rajeynaynaa in tusahani uu aad kuu caawiyay, imaanshahaaga ama soo degitaanka Bristol ha kuu noqdo mid wanaagsan – nasiib wacan.